

**Quursigii noqey cudur,  
qalin lagu daweyn karin** von Abdullahi A. Osman

Qarniyo badan ka horoow  
Qoys buu ahaa Aadmigu  
Deegaan qura ku noolo  
Qaawanoo is garab dega  
Debka wada qaaqama  
Haddey gaajo qabatana  
Qudaar geedaha ka goosta  
Ama Qaanso, Falaar iyo dabin  
Quudkiisa ku raadsada  
Kuwa baahi qaxaa iyo  
Qaaxootina ma uu jirin.

Kuwaan quusaneynoo  
Qur gooyaba ha gaartee

Qarsinkoodoo buuxsama  
Qasadkoodu uu yahey  
Damaca iyo Quursigu  
Qaloocuna wuu jirey  
Haddii la is qiilaafoo  
Hubka la isku qaatana  
Qarax iyo Xasuuq badan  
Qasaarahani ma uu jirin.

Qoyskii hadaba taran  
Qaaradana u kala guur  
Qaar baa Dayax tegey  
Kuwana qaawan waliyoo  
Debki qaaqamaayaan  
Inkastoo dhibaataada qaar  
Qodobo iyo xal loo heley  
Jahligiina la quusiyey  
Qoonsigii sii badey  
Quursigii noqey cudur  
Qalin lagu daweyn karin.

Waayaha qiraayoo  
Nabadaan Qalin lagu helin  
Qorey laguma gaaroo  
Qasaarihii ogaanaye

Waxaan qaawilaayaa  
Dagaalada qaraar iyo  
Qaxa oo xal loo helo  
Qaraxa iyo hubkuna go'a  
Qofna baa la dhimanoo  
Laga gudbo quursiga  
Aadmiguna sidii qoys  
Qarniyo nabad ku wada nool.

*erschienen in: Talktogether Nr. 29/2009*